

Warbixinta Wada sheekaysiga Bulshada:

**Muhiimadaha Gurmada iyo Kasoo
kabashada COVID-19**



Waxaa la daabacay Diisambar 2020

Aqoonsiga Dhulka

Waxaan qiraynaa in cilmi baarista iyo abuurista warbixintaan lagu sameeyay dhulka Duwamish iyo Coast Salish kaas oo hadda hooy u ah qabiilada Duwamish, Suquamish, Snoqualmie, Tulalip, Muckleshoot, iyo Puyallup. Waxaan ku dadaalaynaa dhawrista xubnaha bulshada ee qabiiladaan iyo dhammaan qabiilada Asalka ah oo na dhex degan. Dadka asaliyiinta ah ayaa leh mulkiyada dhulkaan iyo kanaalada biyaha muddo kumanaan sano ah, ayagoo qayb wayn ka ah bulshadeena casriga ah sidoo kalena xog badan siinaaya qaababkeena nolosha haddaan nahay Qabiilada kusoo guuray dhulkaan.

Xogta kooban ee Fulinta

Ayadoo ay la socoto isbadelka ku yimid nidaamyada dhijitaalka ah iyo abaalnaqa qotoda dheer ee aan u hayno guulaha qiimaha badan ee nolosha, aafada cudurka COVID-19 waxa uu nagu qasbay inaan sii xoojino sawirkeena guud ee ku aadan kala duwanaanshaha bey'ada.

Sinaan la'aantaan waxay jirtay laga soo bilaabo illaa markii guumaystaha dhulka dagay uu soo galay iyo markii uu soo kacay dhaqaalaha Maraykanka ee ku salaysan qodashada dhulka, hanti goosadka, iyo ganacsiga ku salaysan shidaalka dhulka laga qodo. Xalalka iyo dalabaadka ka imaanaayay Bulshooyinka aan Cadaanka ahayn, Madoowga, kuwa Aasaliyiinta ah (ama BIPOC); bulshooyinka danyarta ah; dadka hooy la'aanta ah; bulshooyinka qaxootiga iyo soo galootiga; iyo bulshooyinka naafada ah ayaa muhiimada saaraaya xariir laba geesood ah oo labada dhinacba faa'iido u leh.

Waxaan ogaanay, kadib markaan cilmi baaris iyo wada sheekaysi la samaynay xubnaha bulshada, in maal gashiyadaan waawayn iyo talooyinkaan siyaasada ay tahay in la sameeyo si loo bilaabo abuurista Seattle ee cadaalad iyo adkaysi badan leh kadib COVID-19 qoomiyadaha dagana ay hormar sameeyaan:



Bulshooyinkeena waxay walaaca ugu badan ka qabaan helitaanka cuntada, qarashka guryaha, adeegyada bulshada, iyo caawimaad ku aadan adeegyada guriga ee

dadwaynaha. Dhammaan iskudayada lagu doonaayo xalinta baahiyahaan waa inay ku jiraan xubnaha bulshada dhammaan intay socoto shaqada qorshaynta, isku xirka, dhaqan gelinta, qaybinta, iwm. Barnaamijyada caawimaada cuntada ayaa u baahan in lagu daro wax soo saar iyo badeecooyin ku habboon dhaqanka oo kasoo baxa nidaamyada cuntada ee maxaliga ah, marka laga reebo dukaamada waawayn ee adeegyada cuntada sida Safeway.



Si toos ah in loo maalgasho dhaqaalaha iyo khayraadka dadka Madoowga, Asaliyiinta, iyo Bulshooyinka kale ee aan Caddaanka ahayn. Yaraynta dhaqaalaha lagu bixiyo nidaamyada

ciqaabka iyo xabsida, sida Seattle Police Department (Waaxda Booliiska ee Seattle), lana kordhiyo maal gelinta taageerada si loo hago adeeg bixiyaasha iyo ururada bulshada iyo barnaamijyada ee xushmada iyo hufnaanta lagu yaqaano.



In toos talo looga qaato lana maal gasho xariiro lala sameeyo Qoomiyadaha Qabiilada, iyo BIPOC si loo qeexo dibna loogu qoondeeyo baahiyaha tooska ah ee adeegga. In la qiro

lana qadariyo waqtiga, shaqaalaha, iyo khibrada xubnaha bulshada ayadoo dadaal jooqto ah la siinaayo. Shaqaalaha barnaamijyada Magaalada iyo naqshadaynta xeerarka waa in lagu saleeyaa baahiyaha BIPOC.



In dib loo qeexo dhammaan shuruudaha codsiga iyo u qalmida si markaas xogta

aasaasiga ah ee warbixinta loo aruursho. Shuruudaha hadda iyo kuwii hore ee codsiga iyo u qalmida si loo helo xaquuqaha aasaasiga ah ee aadanaha sida cuntada, adeegyada dadwaynaha, iyo guryaha ayaa abuuraysa culaysyo aan laga sawaaqsan oo kala sooc ah kuna leh dadka aan sharciyada haysan, qoysaska danyarta ah, iyo bulshooyinka kale ee safka hore.



Waa in la fududeeyaa dadaalada xariirada iyo wada shaqaynta ee u dhaxeeya waaxaha Magaalada taasoo keenaysa xariiro isdhaaf ah oo dhinac walba ka faa'iido oo lala yeesho

bulshooyinka. Door ka siinta nidaamka xeer dajinta bilow ilaa dhammaad. Si toos ah waa in loola xariiro bulshada xili hore, si jooqto ahna loola xariiro. In la abuuro cabiqada iyo qiyaasaadka hufnaanta ee hanaanka socda si loo helo kalsoonida bulshooyinka.

Xogta nagu Saabsan



Environmental Justice Committee (EJC, Gudigga Cadaalada Bii'ada) ee Magaalada Seattle wuxuu adkeeyaa doorka bulshada aan caddaanka ahayn ku leedahay barnaamijyada bey'ada ee Seattle waxaana haga Equity and Environment Agenda (EEA, Ajandaha Sinaanta iyo Bey'ada). EJC waxay xaqiijiyaa in sheekooyinka, khibradaha, iyo muhiimadaha xeerka ee BIPOC ay jiheeyaan shaqada bey'ada ee Magaalada Seattle. Xog dheeraad ah oo ku saabsan EJC waxaa laga heli karaa webseetka Magaalada ee Environmental Justice Committee.

Waxaan higsanaynaa bey'ad caafimaad iyo sinaan u leh dhammaan dadka iyo noolayaasha, taasoo ay ku jiraan mushaar nolashooda ku filan iyo fursado dhaqaale oo waxtar leh dhawraayana badqabka bey'ada. Higsigaan wuxuu diirada saarayaa bulshooyinka safka hore asagoo kordhinaaya helitaanka fursadaha hogaanka, door ku yeelashada habraacyada go'aan gaarista, hogaanka bulshada, iyo maal gashiyada dhammaan bulshooyinka kala duwan.

Hogaamiyaasha soo socda ayaa hadda ka tirsan gudigga EJC:

Abdullahi Jama	Jaimée Marsh	Nancy Huizar * <i>Xubin kamid ah</i>
Dana Wu/ 吳淑如 *	Jose Chi *	<i>gudoomiyaasha</i>
Debolina Banerjee *	Joshua Jenkins *	Pah-tu Pitt * <i>Xubin kamid ah</i>
Dennis Comer	Karia Wong *	<i>gudoomiyaasha</i>
Edwin Wanji	Kimela Vigil	Ruby Stacey * <i>Xubin kamid ah</i> <i>gudoomiyaasha</i>

Natijoooyinka warbixintaan waa la isku dhafay waxaana nidaamshay Xubanaha EJC ee kor ku xusan lagu asteeyay *

Si aad u akhrido warbixinta buuxda oo af Ingiriisi ku qoran, booqo [webseetka EJC](#).

The City of Seattle's Environmental Justice Committee

www.seattle.gov/envirojusticecommittee

To receive this document in an alternate format, please contact Seattle's Office of Sustainability and Environment at equityenviro@seattle.gov

Report design by

